



AKHRISKA XAGAAGA

Ilmahaaga ka caawi suu iskoolka ugu fiicnaan lahaa !

Ma ogeyd in carruurta wax akhrisata xagaaga ay iskoolka ku fiicnaadaan?

Siyaabo ilmahaaga looga caawiyo say akhriska ugu fiicnaan lahaayeen:

- Kaarka laybareeriga ilmahaaga uga samee laybareeriga dadweynaha ee xaafaddaada. Waa lacag la'aan!
- Ilmahaaga ku qor naadiga akhriska xagaaga laybareeriga lacag la'aanta.
- Ilmahaaga ku dhiiri gali inay wax akhriyaan maalin walba. Marka ilmuhu wax akhristaan xagaaga, ayey guga iskoolka ku fiicnaadaan.
- Ilmahaaga u ogolow inay doortaan buugaagta ay ka helaan. Marka ilmuhu ka helaan wax akhriska, ayey akhriska sii badiyaan xirfadahooduna sare u sii kacaan.
- Ilmahaaga su'aalo ka weydii buugaagta ay akhrinayaan. Buugaagta oo ay afkooda uga warbixiyaani, waxay ka caawimaysaa inay sheekooyinka u fahmaan si fiican.
- Ilmahaaga u akhri ama wada dhageysta buugaagta maqalka. Ka hadalka sheekooyinkii idinka dhexeeyey waxay ilmahaaga ka caawinaysaa barashada kalmado iyo fikrado cusub.
- Tus inaad adiguba ka heshid akhriska. Iskaa wax ugu akhriso afkii ad dooratid.